

- **Sababtoo ah Shuruudaha Tallaalka COVID-19 ee Oregon ee Macallimiinta iyo Shaqaalaha Dugsiga, dhammaan mutadawiciinta shakhsii ahaaneed waxaa looga baahan doonaa inay bixiyaan caddaynta tallaalka ka hor intaysan tabaruc ahaan ugu bixin dugsiga PPS ama xarunta.**
 - Sannad dugsiyeedka 2021-22, mutadawiciinta muhiimka ah oo keliya ayaa loo ogolaan doonaa inay iskaa wax u qabso ah ka sameeyaan dugsiyada PPS, sida uu go'aamiyo maamulaha dugsigu.
 - Mutadawiciinta hore loo ansixiyay ee raba inay shakhsii ahaan iskaa wax u qabso ah laakiin aan keenin waraaqahooda tallaalka COVID-19 degmada waa inay dib u codsadaan iyagoo buuxinaya codsiga iskaa wax u qabso ee hoose.
 - Mutadawiciinta aan laga tallaalin COVID-19 ama aan doonayn inay wadaagaan koobi ka mid ah dukumeentigooda tallaalka COVID-19, waxa kaliya oo lagu meelayn karaa hawlo tabaruc ah oo aan lala xidhiidhin waxaana loo kala saaraa "Tabaruc Fog."

Noocyada la aqbali karo ee dokumentiyada tallaalka COVID-19 waxaa ka mid ah:

- Koobiga Kaarka Diiwaanka Tallaalka ee COVID-19 (waxaa soo saartay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Xarumaha Xakamaynta & Kahortagga Cudurrada ama Kaarka Jaallaha ee WHO); AMA
- Sawir, ama koobi la iskaanay oo ah Kaarka Diiwaanka Tallaalka sida dukumeenti gaar ah; AMA
- Dukumeenti aad hesatid ama mid dhijitaal ah oo ku saabsan tallaalka COVID-19 ee bixiyan daryeel caafimaad